

Gargaar Maaliyadeed

UJEEDDADA: In la sookoobo shuruudaha iyo hab-dhaqannada Children's Hospital's marka loo eego bixinta gargaarka maaliyadeed.

XEERKA: Seattle Children's Hospital ayaa bixisa daryeel caafimaad ku habboon baahida gaarka ah ee carruurta jirta ilaa 21 sano jir ee ah degganayaasha Washington, Alaska, Montana, ama Idaho, iyada oo aan loo eegin awooddooda lacag bixinta. Gargaarka maaliyadeed (daryeelka samafal) ayaa loo siiyaa carruurtaas iyada ku salaysan baahida qoyska iyo khayraadka isbitaalka. Seattle Children's ayaa u dhidibtay shuruudaha bixinta gargaarka maaliyadeed iyada oo waafaqsan sharciga arrinta khuseysa, kana midka yihiin shuruudaha Cutubka 246-453 ee Xeer Maamulitaan Washington (WAC) iyo §501(r) ee Xeerka Dakhliga Gudaha iyo xeerka fulinteeda. Go'aannada uqalmitaanka gargaarka maaliyadeed ayaa loo sameeyaa iyada oo aan loo eegin ciriq, midab, diin (caqiido), sinji, isku aqoonsi ama muujin jandar, doorbidka sinjii, asal qaran (isir), naafanimi, da', macluumaad hidde-wadeyaal, xaalad guur, muwaaddinimada, uurka ama ummuultaanka, heerka dhowrsan ee ciidan horay uga tirsanaan, ama heer kasta oo kale oo u dhowro sharci qaran, federaal, gobol, ama deegaanba.

Seattle Children's ayaa raacda Xeerka Dawaynta Caafimaadka Gurmada ah iyo Foosha Firfircoon iyo qawaaniinta fulintooda (EMTALA), oo u baahan dhammaan bukaan u yimaad daryeel Waaxda Imarjanisga (ED) caafimaad ahaan loo baaro oo xaaladdooda loo dejiyo, takoor la'aan iyo iyada oo aan loo eegin da'da; deggenaanshaha, ama xaaladda maaliyadeed ee bukaanka.

HABRAACA:

I. Marin u helitaanka Adeegyada Gurmada:

A. Marin u helitaanka adeegyada gurmada iyada oo bilaa takoor ah looma daahin doono ama looma diidi doono iyada oo ku salaysan awoodda bixinta shaqsigaa ee adeegyada ama go'aaminta caynsanaanta caymis ee shakhsiga ama uqalmitaanka gargaarka maaliyadeed.

II. Baaxadda Gargaarka Maaliyadda:

A. **Qeexidda** – Ujeedooyinka xeerkan markay tahay, gargaar maaliyadeed waxa u la socda in laga bixiyo wixii kasta ee baaqi bukaanka ku maqan ee buuxda ama qayb ahaan ah kadib habsocodsiinta qolada saddexaad ee u qalma bukaanka/qoyska. Kala taliyeyaal dhaqaale ayaa waliba bixin kara qiyaas marka la weyddiisto, iyo ka gargaarka codsiyada Medicaidka iyo Qorshaha Caafimaad ee Uqalma (QHP), iyo samaynta qorsheyaal bixin bilaa dul-saar ah. Kala taliyeyasha dhaqaale ayaa laga heli karaa lambarka (206) 987-3333.

B. **Maxay yihiin ku dallacyada u Gargaarka Maaliyadeed dabbarayo:** Gargaarka maaliyadeed ayaa loo isticmaali doonaa adeegyada ku habboon ee gurmada ah ama caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, tus., adeegyada isbitaalka sida macquulka ah loogu garto inay helaan, saxaan, daweeyaan, wax uga taraan, ama ka hortagaan ka sii darka xaaladaha halista galinaya nololsha ama u sababaya silcitaan ama laxaw, ama

ku dambayn karta xanuun ma curyaannimo, ama haalis galisa ama u horseedda ama ka sii darta curyaannimada, ama u horseedda doorsoonka amacilladowga jirka, oo ayna jirin wax kale oo la mid ah oo wax ka tara, oo caadi ahaan ka sii badan ama ah dariiq si aad ah qiimahiisu uga jaban yahay habka dawaynta la heli karo ama u habboon qofka adeegga weyddiisanya.

1. Ku dallacyada loogu talagalay adeegyada ah is-qurxinta ama ikhtoyaariga ah ayaan u mutaysnayn gargaar maaliyadeed. (Eeg tusaalooyinka ku jira LIFAAQA I)
2. Gargaarka maaliyadeed ma aha barnaamij lagu raasamaaleeyo adeegyada ay bixin karaan bixiye kale oo ka tirsan bahda caymiska bukaanka oo ayna caymiskaasi ansixin in lagu siiyo ee Seattle Children's.

C. Daryeel bixiyayaasha ah ee Gargaar Maaliyadeed aanu cayminayn:

1. Daryeel bixiyayaasha bukaan-jiifka Seattle Children's:
 - a. Ku dallacyada goobta Seattle Children's Hospital;
 - b. Ku soo dallacyada hawlyaqannada ka soo jeeda bixiyayaasha u shaqeeya ama qandaraas ka hoos qaatay Isbitaalka Seattle Children's ama Children's University Medical Group (CUMG) markay CUMG biilal ugu dallacdo adeegyada bukaan-jiifka lagu bixiyay Seattle Children's *ama* isbitaal jaaliyadeed; iyo
 - c. Ku soo dallacyada hawlyaqannada ka soo jeeda bixiyayaasha u shaqeeya ama qandaraas ka hoos qaatay Seattle Children's CUMG markay Seattle Children's biilal ugu dallacdo adeegyada bukaan-jiifka Seattle Children's *ama* isbitaal jaaliyadeed
2. Daryeel bixiyayaasha bukaan-socodka Seattle Children's:
 - a. Ku dallacyada goobta ee ka yimaad Isbitaalka Seattle Children's ama rugaheeda caafimaad
 - b. Ku soo dallacyada hawlyaqannada ka soo jeeda ka bixiyayaasha u shaqeeya ama qandaraas ka hoos qaatay CUMG markay CUMG biilal ugu dallacdo adeegyada bukaan-socodka ee rug caafimaad Seattle Children's waaxda bukaan-socodka, ama goob ku dhex taal beesha;
 - c. Ku soo dallacyada hawlyaqannada ka soo jeeda bixiyayaasha u shaqeeya ama qandaraas ka hoos qaatay Isbitaalka Seattle Children's, markay Seattle Children's biilal ugu dallacdo adeegyada bukaan-socodka rug caafimaad Seattle Children's, waaxda bukaan-socodka, goob jaaliyadeed
 - d. Dhammaan adeegyada uqalma ee ay ku bixiyaan Rugta Caafimaadka Tobaneeyo Jirayaasha dugisga sare ee Garfield High School u caynsan gargaar maaliyadeed iyada oo raacaysa xeerkan oo kuna salaynsan dakhliga la malaynayo ee ma-qaangaaryaasha daryeelkooda oggolanaaya.
3. Daryeel bixiyayaasha aan la caymin:
 - a. Daryeel bixiyayaasha jaaliyadda ee ka hawlgala Seattle Children's ee biilkooda hawlyaqannimo si gaar ah uga dallaca dada ayaa go'aansan kara inay siiyaan gargaar maaliyadeed iyada oo waafaqsan xeerka gargaarka maaliyadeed ee Seattle Children's. Eeg Lifaafa II magac iyo meherad ahaan liiska daryeel bixiyayaasha jaaliyadda ee leh mudnaanta gelinta Seattle Children ee aan raacin go'aammada gargaarka maaliyadeed ee Seattle Children's.

Bogga 3: Xeerka/Habraaca Maamuleed: Gargaar Dhaqaaleed

- D. **Dhererka Muddada** – Gargaar maaliyadeedka ayaa guud ahaan loo bixiyaa si isbiirsi ah lixdii biloodba, iyada oo ku xiran, hase yeeshe, in gargaarka maaliyadeed ee loo bixiyo qorshe daryeel gurmada loo ansixin doono kaliya taariikhaha qorshaha daryeelkaas; iyo maamulitaan iyo oggolaansho macquul ah oo loogu talagalay muddo wakhti u go'aamiyo ansixiyuhu. Bukaannada ama ciddii ka mas'uul ah ayaa codsan kara wakhti kasta.

III. Shuruudaha Uqalmitaanka Gargaarka Maaliyadeed:

Bukaannada waa inay la kulmaan **dhamman** shuruudaha soo socda si ay u mutaystaan gargaarka maaliyadeed:

- A. **Degganaanshaha** – Bukaanku waa in deggan yahay Washington, Alaska, Montana, ama Idaho (“Rijinka WAMI”). Dadka bukaanka ah ayaa loo qaddariyaa inay ka tirsan yihiin Rijinka WAMI kaliya haddii, ka hor inta aanay bilaabin qorshahooda daryeel, hoygooda ugu muhiimsani ku yaal gobollada ku yaal Rijinka WAMI. **Kuwa ka Reebban:**
1. Seattle Children’s ayaa dhici karta inay siiyo gargaar maaliyadeed muddo dherer-xaddidan leh bukaannada deggan meelo ka baxsan rijinka WAMI markay bukaannadu yeeshaan bilow jirro lama filaan oo gurmada u baahan.
 2. Bukaannada loo beddelayo organnada muhiimka ah ee ku nool Oregon ama Hawaii ayaa uqalma gargaarka maaliyadeed sababta oo ah gobolladan oo ah qayb ka mid ah rijinka wadaagga ka beddelada organnada Seattle Children’s Hospital UNOS.
 3. Sarkaalka Lacag Hayaha ugu Sarreeya ah ama wakiilka ayaa adeegsan doona u gacan bannaanidooda inay ka dhaafaanshuruudda degganaanshaha arrin ka arrin ahaan markay yihiin xaalado daryeelku kaliya u jiro Seattle Children’s. Waxa la filayaa in ka dhaafyadan oo kale siintoodu aad dhif u tahay.
- B. **Da'da** – bukaanku waa inuu yahay ilmo. Markay tahay ujeedooyinka xeerkan, shaqsigu ka yar 21 sano ayaa loo qaddariyaa ilmo. **Kuwa ka Reebban:**
1. Qaangaarayaasha lagu baarayo ama lagu daweeeyay Seattle Children’s si loogu sii wado daryeelka bukaan Seattle Children’s oo ah ilmo (tusaale ahaan, ka tijaabinta jiritaan qaaxo ama baaritaanka hidde-wadayaasha) ayaa uqalmi kara gargaar maaliyadeed. Waxa ka mid ah qaangaarayaasha hela daryeelka uurka.
 2. Bukaannada jira 21 sano iyo inta ka wayn ayaa uqalmi kara gargaar maaliyadeed marka (a) ay heleen U Ansixinta Lacagta Dheeraadka ah ee Caafimaadka loogu talagalay qorshe daryeel sida ugu fiican loogu daweeyo Children Seattle iyada oo loo maro nidaamka lagu koobay xeerka **Bukaannada 21 Sano ama In Ka Wayn Jira** ; ama (b) ku heli doona baaris caafimaadka iyo/ama daryeel xaalad dejin ee Waaxda Imarjansiga (ED).
- C. **Fuundayn Ka Duwan** – Gargaarka Maaliyadeed ee Seattle Children’s ayaa ah il fuundayn labaad kadib marka dhammaan fursadaha kale ee fuundayn oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn caymiska caafimaadka shaqsigu ama kooxda, barnaamijyada dowladda ee uqalma, oo ay ka mid yihiin Medicaid, iyo barnaamijyada qolooyinka saddexaad ama magdhawga shaqaalaha ee arrinta ka mas'uulka ah, deeq loo qoondeeyay ama isku lacag ammaanda loogu dhigay, ama qof kasta ama cido kasta oo kale ee xilku ka saaran yahay inay bixiyaan lacagta adeegyada caafimaadka.

Bukaanda aan lahayn ilo kale oo fuundayn, oo ay ku jiraan kuwa aan caymiska lahayn ama aan u lahayn caynsanaan adeegyada la bixiyay ama la bixin doono, ayaa looga baahan doonaa inay codsadaan Medicaid ka hor inta aan gargaar maaliyadeed la siinin. Bukaanka ayaa dooran kara inuu iibsado Qorshe Caafimaad Uqalma (QHP) haddii ay khuseyso halkii u qofkaas isku qori lahaa Medicaid. Bukaannada iska qoray koox wadaagga iskaashiga kharashka daryeelka caafimaadka ayaa loo qaddariyaa inayna lahayn caymis. Kala taliyeyaasha maaliyadeed ee Seattle Children's ayaa meesha u jooga inay ka caawiyaan qoysaska nidaamka codsiga Medicaid ama codsiga QHP. Kala taliyeyaasha maaliyadeed ayaa laga yaabaa inay ka dhaafaan shuruudda codsiga Medicaid haddii, tusaale ahaan, ay ogaadaan inta ay socoto nidaamka arrimo eegitaanka hore inuu bukaanku aanu uqalmin doonin Medicaidka. Seattle Children's ayaa xaq u leh inay u baahato xaqiijin qoran inaanu bukaanku uqalmin ilo dhaqaale helitaan duwan.

Haddii u bukaanku/qoysku u falsafad, diin, ama wax kale oo ah diidmo shakhsi ahaan uu uga leeyahay codsashada Medicaid, bukaanka/qoyska ayaa ku sifayn kara arrintaas qoraal ahaan oo waxa dhici karta in la siiyo fursadda ah inay lacag ahaan mas'uul ka noqdaan qaddarka u dhiganta lacagta ah inta WA Medicaid ay siin lahayd Seattle Children's kahor gargaar maaliyadeed ee bixinaya wixii baaqi ah ee dhiman. Deebaaji hore oo loogu dhigo qadarkaas lacageed ayaa laga yaaba in la weyddiisto qoysaska dakhligoodu ka badan yahay 200% Heerka Saboolnimada ee Federaalka markay tahay adeegyada ah xaaladaha aan ahayn imerjansiga (degdegga) ah.

- D. **Dakhliga** – Bukaannada ayaa laga yaaba inay uqalmaan gargaar maaliyadeed oo buuxa haddii bukaanka ama cidda mas'uulka ka ahi leeyihiin dakhli wadareed qoys ah ama ka hooseeya 400% Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka sida loogu qiyaasay tirada qoyska. Haddii ay iskood u shaqayste yihiin, macluumaadka dakhliga saafiga ah (guriga loo qaato) ayaa la isticmaalaa. Qadarka lacagta qoysku gaar ahaan ugu bixiyaan dhinaca bixin xilliyeedka caymiska caafimaadka xubnaha carruurtooda ayaa laga jari doonaa dakhli wadareedka qoyska kahor intaan la qiimayn. Caddayn dakhli oo lagu xaqiijiyo macluumaadka ku tilmaansan foomka codsiga ayaa dhici karta in la weyddiisto, kuwas oo ay ka mid yihiin istabyada jeegagga lacag bixinta shaqada iyo/ama dakhliga canshuurta.

Dadka ka mas'uulka ah ee dakhligoodu u dheexeyo 400% iyo 599% marka loo eego Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka ayaa laga yaabaa inay uqalmaan gargaar maaliyadeed qayb ahaan ah oo ay mas'uul ka noqon doonaa in qoqollay lagu qiyaaso qaddarka ku maqan. Markan oo kale iyaga ayaa ka mas'uul ah qayb ka mid baaqiga lagu leeyahay, oo gargaarka dhaqaale ee Seattle Children's ayaa dabbari doon baaqiga intaa k maqan.

Xaaladaha cidda ka mas'uulka ahi ay haddii kale uqalmaan lacag dhimista caymis la'aanta ama lacag dhimis shaqaale ahoow waliba uqalma gargaar maaliyadeed oo qayb ahaan, cidda ka mas'uulka ah ayaa heli doonta kaliya gargaarka maaliyadeed ee qayb ahaanta ah, taas oo ah dhimis ugu deeqsisan. Lacago ka dhimitaano badan loogu xisaabin maayo koonto isku mid ah.

- E. **Codsiga** – Bukaanka ama cidda ka mas'uulka aha ayaa ah inay soo gudbiyaan

Bogga 5: Xeerka/Habraaca Maamuleed: Gargaar Dhaqaaleed

foomka codsiga, iyaga oo buuxiya foomka onlaynka ah ee ku yaal www.seattlechildrens.org ama iyaga oo ka daabacda foomka warqadda ah isla bartan internet oo markaa ku soo dira boostada ama u soo faakis gareeya sida lagu tilmaamayo foomkaas ama iyaga oo buuxiya codsi warqad ah, oo laga soo qaadan karo miiska diiwangeliinta Seattle Children's ama lagaga helo helo boostada kala taliye maaliyadeed, iyo iyada oo boostada ama faakis lagu diro sida lagu tilmaamayo xirmada codsiga sidaas oo kale ah. Codsiyada ayaa la soo gudbin karaa ka hor bixinta adeegyada, inta lagu guda jiro daryeelka, ama kadib marka adeegyada la bixiyo.

- F. **Uqalmitaanka Macquulka ah** – Xaaladaha bukaanka si macquul ah loogu qaadan karo inuu uqalmo gargaarka maaliyadeed, iyo marka habsocodyada codsiga caadiga ah aan lagu dhammaystiri karin sababo arrimo dhaqan-dhaqaale ama arrimo kaleba, ee Agaasimaha Caafimaadka Seattle Children's, Sarkaalka Madaxa u Ah Arrimaha Dhaqaalaha, ama Agaasimaha Sare Ee Wareegga Dakhliga, ama wakiilkooda, ayaa u garan kara inuu bukaan uqalmo gargaarka dhaqaale markayna jirin helitaanka dhammsan macluumaadka loo baahan yahay. Waxa intaa u dheer, markay qoysku ku soo biiriyaan macluumaad dheeraad ah arrimaha ku saabsan xaaladdooda dhaqaale, isla shakhsiyaadkaas ayaa maamulitaan ahaan samayn kara go'aan gargaar maaliyadeed iyada oo isticmaalaya macluumaadkaas. Seattle Children's ayaa dhici karta inay eegto macluumaadka arrimaha khuseeya ee dowladda laga heli karo ee ku saabsan xaaladda maaliyadeed ee qoyska inta ka sokaysa warbixinta daynta, xaaladaha markay qoysku aanay ka jawaabin biilka lacagta baaqiga ku maqan, mararka marka qoyska waa ka qaban biil baaqiga u fiican, oo laga yaabaa inay siiyaan gargaar maaliyadeed macquul ah lacagtaas lagu leeyahay ee ah baaqiga uqalmitaanka ku salaysan macluumaadkaas. Dhammaan gargaarka maaliyadeed ee loo bixiyay macquul ahaan ayaa kalaiya ku aaddanaan doona baaqiyadii hore loogu lahaa.

IV. **Nidaamka Go'aaminta Gargaar Maaliyadeed:**

- A. **Xogta** – dhammaan macluumaadka la xiriira codsiga ayaa loo hayn doonaa si astyuran. Go'aanka uqalmitaanka ayay ku samayn doontaa Waaxda Adeegyada Meheraddu gudaheeda afar iyo toban (14) maalmood marka la helo dhammaan macluumaadka loo baahan yahay. Seattle Children's kuma kici doonto hawlo ka soo urursi lacageed aan caadi ahayn inta lagu jiro habsocodka u fiirsiga codsiga.
1. **Oggolaanta** – Warqad sheegaysa oggolaanta gargaar maaliyadeed iyo muddada uqalmitaanka ee khuseysa arrinta ayaa loo soo diri doonaa cidda codsatay gargaarka maaliyadeed.
 2. **Sugitaan** – Haddii ay dhacdo in la helo codsiga oo aan lahayn macluumaad dhammaystirnayn, ama bukaanka/qoyska aan caymiska lahayn aanay dhammaystirin habsocodka uqalmitaanka Medicaid, warqad u sheegaysa sababta codsiga looga dhigay Sugitaan ayaa loo diri doonaa cidda codsatay gargaarka maaliyadeed. Haddii macluumaad jawaabitaan ah aan lagu helin 14 maalmood ogaysiiskan laga soo qaado, codsiga ayaa la diidi doonaa.
 3. **Diiditaannada** – Haddii ay dhacdo inay Seattle Children's go'aamiso inuu bukaan aanu uqalmin gargaar maaliyadeed, diidmada oo qoraal ah ayaa la siin doonaa codsadaha sababta(ha) diidmada, taariikhda go'aanka, iyo tilmaamaha racfaanka ama dib-uga-fiirsashada.
 4. **Racfaannaada** – Codsadaha ayaa rafcaan ka qaadan kara diidmada uqalmitaanka gargaar maaliyadeed iyaga oo bixiya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dakhliga, tirada, xilalka kale ee saaran qoyska, ama

Bogga 6: Xeerka/Habraaca Maamuleed: Gargaar Dhaqaaleed

arrimo kale oo la xiriira in Agaasimaha Sare ee Wareegga Dakhliga gudaheecda soddon (30) maalmood laga bilaabo marka la helo ogaysiiska. Agaasimaha Sare ee Wareegga Dakhliga ayaa dib u eegi doona dhammaan rafcaannada si loo go'aanka ugu dambeeya. Haddii u go'aankan ugu dambeeyaa xaqiijinayo diidmadii hore ee gargaar maaliyadeed, ogaysiis qoraal ah ayaa loo diri doonaa cidda ka mas'uulka ah iyo Waaxda Caafimaadka iyada oo waafaqsan sharciga gobolka.

Haddii ay dhacdo in bukaanka/qoyska ama cid kale oo mas'uul ka ahi lacag u bixiyo adeegyo isbitaalka caafimaad lama huraan ah oo hadhow la ogaado inuu bukaanku/qoysku qanciyeen shuruudaha gargaarka maaliyadeed, lacagaha lagu bixiyay adeegyada xarunta 90kii maalmood ee ka horreeyay go'aaminta uqalmitaanka ayaa marka hore lagu bixin doonaa baaqiyada maqan ee kale, oo markaana dib loogu soo celin doonaa gudahooda soddon (30) maalmood. Biximaha lagu aaddiyay adeegyada xirfadyaqaanimo ayaan la soo celin doonin. Haddii ay dhacdo in bukaanka/qoyska loo diido uqalmitaanka gargaarka maaliyadeed oo aanu lahayn ilo dhaqaale dhinac saddexaad laga helo ama qiimo dhimis, lacag dhimis 25% ayaa si toos ah loogu aaddin doonaa ku dallacyada bukaanka. Bukaanka ama cidda mas'uulka ah ayaan lagu dallaci doonin lacagta oo buuxa. Heerkan lacag dhimis ayaa la mid ah ama ka wayn dhimista celceliska ah ee lagula heshiiyay dhammaan bixiyeyaasha ugu waawayn ee aan ahayn Medicaid.

B. Gargaarka Maaliyadeed ee Qayb Ahaanta Ah (Heerar Kala Sarayn Loo Qiyaaso):

Marka cidda ka mas'uulka ahi uqalanto gargaar dhaqaale qayb ahaan ah (heerar kala sarayn loo qiyaaso), Seattle Children kuma dallici doonto bukaanka in ka badan qaddarka celcelis ahaan ay u bixiyaan dhammaan lacag bixiyeyaashu (Medicare, Medicaid iyo bixiyeyaasha ganacsiyeed) muddadii sannadkii maaliyadeed dhammaystirnaa ee isbitaalka. Taas waxa loo yaqaan "qaddar badiyaa lagu dallaco" ama AGB. Eeg Lifaafa III si aad u aragto qaddarka lacagta ugu badan ee hadda mas'uuliyadda lacageed ah markay tahay gargaar maaliyadeed ee qayb ahaanta ah.

V. La Xiriirka Dadwaynaha:

Macluumaadka ku saabsan xeerka gargaarka maaliyadeed ee Seattle Children's ayay dadwaynuhu u heli karaan sida soo socota:

- A. Ogaysiinta Dadweynaha/Turjumaadda – Ogaysiis ayaa lagu muujin doona dhammaan goobaha diiwaangelinta irridaha laga soogalo ee muhiimka ah iyaga oo ah Ingiriisi, Isbaanish, Fiyetnamiis, Ruush iyo Soomaali. Intaa waxa u dheer, xeerka gargaarka dhaqaale ee Seattle Children's, oo bayaan luqad kooban oo gargaarka maaliyadeed ah, iyo foomka codsiga gargaarka maaliyadeed ee luqadahan ayaa ku yaal barteeda internetka ee ah www.seattlechildrens.org. Fursad dheeraad ah ayaa laga heli karaa barta internetka si loo turjunto mid ama dhammaan dukumentiyada luqad kasta oo kale ee lagag hadlo beesha gudaheeda 7-10 maalmood.
- B. U Wargelin Shaqsi – Seattle Children's ayaa uga dhigi doonta macluumaadka gargaar maaliyadeed inay heli karaan qof kasta oo loogu adeegayo gobta daryeelka Seattle Children's. Foomamka codsiga oo warqad ah kuna qoran Ingiriisi, Isbaanish, Fiyatnaamiis, Ruush ama Soomaali ayaa diyaar u ah in laga qaato dheskiyada diiwaangelinta dhammaan rugaha caafimaadka Seattle Children's.

Bogga 7: Xeerka/Habraaca Maamuleed: Gargaar Dhaqaaleed

- C. Kala Taliyeyaasha Dhaqaale – Kala Taliyeyaasha Dhaqaale, ee marinka u leh adeegyada turjumaan luqadaha aan Ingiriisiga ahayn, ayaa loo heli karaa qof haan iyo telefoon ahaanba (206-987-3333) si looga caawiyo dhammaystirka codsiga.
- D. Biilasha bukaanka – Biil kasta oo loo diro qoys, oo ay ku jiraan biilka ugu horreeya ee la soo diro inta ka dambaysa ka bixidda isbitaalka, ayay ku qoran yihiin macluumaad ku saabsan helitaanka gargaar maaliyadeed iyo lambarka la wacayo si loo helo caawimo dheeraad ah.

Waxa gacanta ku haya: Maareeyaha Sare ee Wareegga Dakhliga

Waxa dib u eegay: Lori Kapp, Mareeyaha, Hawlaha Wareegga Dakhliga
Jodi Long, Looyarka La Taliya Qareenka Shirkadda
Kelly Wallace, Madaxwayne ku Xigeenka
Sare & Sarkaalka Ugu Sareeya ee
Maliyadda Lisa Hayward, Madaxwayne ku
Xigeenka Sare & Qareenka Guud Counsel

Waxa dib ugu noqday: Suzanne Vanderwerff, Maareeye Sare, Wareegga Maaliyadda

Waxa ansixisay Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington: 04/05/10, 11/12, 03/13, 05/16

WAXAA ANSIXISAY: Cindy Gazecki, Madaxwayane Ku Xigeenka u Qaabbilsan Hawlaha Isbitaalka

DIB LOOGU FIIRSADEY: 11/12, 03/13

DIB LOOGU NOQDAY: 05/00, 01/05, 07/05, 08/06, 04/10, 11/12, 03/13, 05/16

Ereyada Muhiimka ah oo Dheeraad ah: Sadaqada, Daryeelka bilaashka ah, Biil Ku Dallaca Bukaanka, Aan La Bixin

LIFAAQ I:

Adeegyada Seattle Children's ay go'aamiisay inay yihiin kuo la doorto ama la isku qurxiyo oo sidaas daraaddeed aan uqalmin gargaarka maaliyadeed waxa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn:

1. Adeegyada ilko qurxinta isku toos-la'aanta ilkaha markayna jirin xaalad caafimaad oo hoosta ka jirta.
2. Qaangaarayaasha u raadinaya tijaabada hidde-wadayaasha ujeedooyin ogaansho haddii xaalad hidde-wade loogu gudbin karo carruurtooda mustaqbalka AMA tijaabada hidde-wadayaasha bukaanka markay tijaabintani oo kale aanay bixin doonin macluumaad wax ka tarta qorshaha daryeelka bukaanka
3. Habraaca dib u-qaabaynta qurxinta dhegta
4. Qalliinka leysarka loo sameeyo kaliya ujeedooyin qurxin
5. Qalliinka dib u-qaabaynta dhegta ujeedooyin qurxin
6. Ku beddelsho ilko xajiyeyaal lumay
7. Xulasho barnaamijyo/fasallo caafimaad dhimir

LIFAAQ II:

Daryeel bixiyayaasha jaaliyadda ee leh u-mudnaanta gelinta isbitaalka ee ka sameeya xafiiskooda u-gaarka ah ku dallaca adeegyada lagu bixiyo Seattle Children's, ee aan bixin gargaar maaliyadeed oo ku waafaqsanayn go'aammada Seattle Children's biilashooda u gaarka ah, yaa hoosta ku liis garaysan.

Bixiyaha leh calaamadda asterisk ayaa ah mid ka shaqeeya ama kula jira qandaraas Seattle Children's oo waliba ka soo dira bukaannada meheradooda jaaliyadeed inay ku helaan adeegyo Seattle Children's. Gargaarka maaliyadeed ayaa la bixiyaa keliya marka la arkayo bukaannada shaqaale ahaan ama qandaraasle Seattle Children's.

Liiskan ayaa isbeddeli kara saddexdii biloodba mar, waxaana laga cusboonaysiin doonaa www.seattlechildrens.org.

Magaca Meheradda ama Bixiyaha Daryeelka
Allegro Pediatrics
Dr. Senait Abraham Sea Mar Medical Clinic
Dr. David Atherton Dentistry for Children & Adolescents
Dr. Molly Capron Neighborcare - Columbia City
Dr. Felix Chu The Polyclinic - First Hill
Dr. Daniel Downey Downey Plastic Surgery
Dr. Mary Farrington Virginia Mason Medical Center
Dr. Julie Francis Eastside Dermatology Inc.
Dr. Heather Henne Neighborcare - Columbia City
Dr. Robin Hornung Everett Clinic
Dr. Shayan Irani Virginia Mason Medical Center
Dr. David Jeong Virginia Mason Medical Center*
Dr. Neil Kaneshiro Woodinville Pediatrics
Dr. Richard Kozarek Virginia Mason Medical Center
Dr. Thomas Lenart Children's Eye Doctors
Dr. John Liu Eastside Pediatric Dental Group
Dr. Sally Sue Lombardi Eastside Pediatric Dental Group
Dr. Kimberly McDermott Neighborcare - Columbia City
Dr. Craig Murakami Virginia Mason Medical Center
Dr. Michael Nuara Virginia Mason Medical Center
Dr. Hee-Jung Park Virginia Mason Medical Center
Dr. Mary Pew Neighborcare - Meridian*
Dr. Donna Quinby Eastside Pediatric Dental Group
Dr. Seth Schwartz Virginia Mason Medical Center
Dr. Peter Shelley Federal Way Eye & Laser Center
Dr. Jessica Tarantino ABCD, Inc.
Dr. Cornelius Van Niel Sea Mar Comm Health Center
Dr. Michael Whelan Sound Surgery*
Dr. Bryan Williams Seattle Special Care Dentistry*
Dr. Dali Wu Sea Mar Comm Health Center

LIFAAQ III

Iyada oo ku saleysan dhammaystirkii sannad maaliyadeedkii 2015, inta ugu badan ee bukaanka haysta qayb ahaanta gargaar maaliyad ayaa noqon doonta ku dallac ah 50%. Ku dallacii celcelis guud ahaan ama AGB sannad maaliyadeedkii 2015 dhammaan bixyeyaasha marka loo eego ayaa ahayd 51%.